# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 40aad Fadhigii 20aad

**Sabti 03 Aug, 2019**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Baashe Maxamed Faarax.

Ajandaha Fadhiga: - Doodda Xeerka Macdanta Somaliland.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise (20min 40sec):-** Dhamaan Waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Asc, Mudanayaal iyo Mudane Gudoomiye Xeerka Macdanta ee ina horyaala runtii waa xeer balaadhan oo way adagtahay in laba cisho laga wada gaadhsiiyaa, waayo Xeerku waa 144 Qodob iyo 17 cutub waliba marka lagu daro 12 qodob iyo laba cutub oo Warbixinta Gudidda ku jirta wuxuu noqonayaa 166 Qodob iyo 19 Cutub, anigu Warbixinta Gudidda waan wada akhriyay, Xeerkana xooga baan ka akhriyay, maarkan si kooban u sheego waxaad moodaa xeerku wuxuu xoogaa u badan yahay farsamadii, maamulka, ruqsadaha la bixinayo iyo noocyada macdanta, sahankeeda iyo qodisteeda marka waa xeer maamul.

Qodobada Gudidda iyo Xeerku way is khilaafsan yihiin oo Warbixintooda iyo Xeerku way iska hor imanayaan, waxayna u baahan yihiin in aad iyo aad la isugu hagaajiyo. Warbixinta Gudidda ayaan ku horeynayaa marka hore.

**Qodobka 6aad** Gudiddu waxbay ka badashay oo wuxuu ahaa "Macdanta xadigeedu gaadhsiisan yahay heer ganacsi laga bilaabo maaalinta xeerkani dhaqangalay waxa la wareegaysa Wasaarada Macdanta waafaqsan qodobada Xeerkan" marka sida gudiddu u soo dhigtayna maaha mid cad oo waxba ka khaldan waxayna farqadaasi ku saxsan tahay sidii hore ee Xeerka Xukuumadu soo gudbisay ah.

**Qodobka 11aad Farqadiisa 6aad**iyada Gudiddu waxbay ka badaleen anigu waan sii qurxiyay oo waxay ka dhigeen "ruqsadle kasta oo aan Somaliland daganayn wuxuu magacaabanayaa Wakiil degan oo muwaadin ka ah" marka waxaan ka dhigay oo aan ku saxay ***"Wakiil muwaadin ah oo degan Somaliland"***

**Qodobka 17aad** waxaan ku raacsanahay sida gudidda oo waxay ku soo dareen Baarlamaanka iyo Gudiyadiisa.

**Qodobka 25aad**ee dhulka ruqsada sahanka guud xeerka Xukuumadu soo gudbisay waxay ahayd sidan*"Dhulka Ruqsadda Sahanka guud loo qaatay waa in aanu ka badan kun*

*(1000 km²) oo kilomiter laba jibaaran waana in aanu ka yaraan toban (10) kilomiter oo laba jibaaran dhulkaasina waa in uu noqdaa mid isku dhajisan oo loo qeexo sida lagu heshiiyo".* Sida gudiddu ka dhigtay way yar badiyeen marka anigu waxaan soo jeedinayaa in sidii hore loo daayo Xeerka

**Qodobka 37aad**ee dhulka ruqsada sahanka gaarka ah lagu bixiyay oo laba farqadood ahaa Xeerka Gudiddu way jajabiyeen oo dhowr heer bay ka dhigeen, **Marka Qodobkaasna waxaan odhan lahaa sidii Xukuumada ha loo daayo.**

**Qodobka 50aad** oo ah khidmadaha maamulka, Cusboonaysiinta, Sanad laha iyo Codsiga **Farqada 2aadsida gudiddu ka dhigtay isaga waan ku raacsanahay.**

**Qodobka 55aad**Muddada iyo Cusboonaysiinta Ruqsadda Ilaalinta Dhul-macdaneed Gudiddu waxay ka dhigeen mudadda cusboonaysiinta laba (2) sanadood **waana ku raacsanahay taasna Gudiddda.**

**Qodobka 62aad**Muddada iyo Cusboonaysiinta Ruqsadda Macdan Qodista, Xeerku wuxuu qorayay 20 sanadood oo la cusboonaysiin karo, Gudiddu waxay ka dhigeen 5 sanadood cusboonaysiinta, Xeerka qodobadiisa hadaad eegtona waxa ku qoran 5 jeer ayaa la cusboonaysiin karaa, marka hadaynu 20 sano qaadano ilaa iyo macdantu ka dhamaanayso weeye, marka 5 jeer laga dhigo waxay noqonsayaa ilaa 100 sano oo ka imanaysa 20 sano oo 5 jeer ah, marka xaga gudidda la qaatona waxay noqonaysaa 25 sanadood, marka anigu waxaan soo jeedin lahaa dhex-dhexaad ha laga dhigo ilaa 10 sanadood, **sidaa darteedna ugu badnaan 10 sanadood ha laga dhigo waxayna ku xidhnaanaysa inta macdantu dhamaanayso.**

**Qodobka 63aad**ee dhulka ruqsada macdan qodistaXeerku wuxuu qorayaa *"Dhulka ruqsadda macdan qodista lagu bixinayaa waa in uu noqdo laydi ama sadex xagal qaab ahaan iyo ilaa labaatan kilo mitir oo laba jibaaran (20 km²) cabir ahaan ama wax ka weyn hadii si fiican loo sababayn kararayo in dhulka weyni muhiim u tahay fulinta hawlaha macdan qodista"* Gudiddu waxay soo jeedisay in laga dhigo 48 km² ama lix baloog, marka anigu waxaan odhan lahaa mar hadii la kordhinayo oo xaga hore ay ku qoran tahay in la kordhinayo **sida Xeerka Xukuumada ha loo daayo.**

**Qodobka 73aad** ee Dhulka Ruqsadda Macdan Qodista Kooban, xeerku wuxuu qorayay "Cabirka ugu wayn ee dhulka macdan qodista koobani waa shan boqol oo kiilomiter (500km)" marka waxa halka laga ilaaway oo halka loo jeeddaa 500km² ee maaha 500km.

**Qodobka 78aad** warbixinta Gudidda waxa ku qoran Xeerka waxa lagu kordhiyay qodob 78aad, Xeerkana waxa ku qoran in qodobkaasi 78aad macdan qodista qadiimiga ah, marka waxa ka khaldan oo warbixinta gudidda iyo xeerku way is dhaafsan yihiin, waxaadna mooda inay u jeedaan ajuurooyinka oo ah Qodobka 108aad ee Cutubka 14aad

waayo cutubkaas ayaan ka hadlaya ajuurooyinka, marka waxaan leeyahay ha la iswaafajiyo oo halkiisa qodobkaas hala galiyo.

Warbixinta Gudidda waxa ku qoran Qodobka 150aad mana jiro oo Xeerkuba 144 qodob waa khalad madbiciya baan filayaa, marka halka ha la saxo oo markaad xeerka gudihiisa eegto waa qodobka 139aad ee Xeerka Xukuumada ayaa loo jeedaa ee beyjka 6aad, Gudiddu waxay soo jeediyeen **Qodobkaas 139aad marka farqada 2aad** ee Qodobkaasi wuxu qorayaa *"Qadarka cashuurta ah ee la saarayo faaiidada shirkadu macdanta ka heshay waa boqolkiiba sodon (30%) oo loo xisaabiyo si waafaqsan heerarka warbixinta maaliyadeed ee caalamiga ah (IFRS)"* Gudiddu waxay soo jeedisay in loo daayo Xeer-nidaamiye Wasiirku soo saaro, Xeerkuna wuu cadaynayaa, marka anigu waxaan leeyahay Wasiirku guud ahaan wuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye, laakiin gudidduna may sababayn, **marka sida Xeerka ay ugu qoran tahay ha loo daayo.**

Halka wixii ka dambeeya Mudane Gudoomiye waa Qodobo cusub oo la soo kordhiyay, waa mabaa'diida guud oo cutubka labaad ah waxa lagu soo kordhiyay 8 Qodob, mana Qodobaysna oo qodob cusub uun baa ku qoran, waxaad moodaa in xooga wasiirka la saaray, waana waa xadiddaada ruqsad macdaneed dhul saareyaal ah, oo waxay leedahay *Wasiirku ma bixin karo ruqsad macdaneed oo cid awood u siinaysa hawl-galo macdan sahmin ama qodis oo laga sameeyo wax dhulka wasiirku uu ku sheegay, marka qaabka ay u qoran tahay ma cadda*, **sidaa darteed qodobadaas oo aad u fara badan waxay u baahan yihiin in dib loo akhriyo.**

**Qodobka 2aad**waa xadiddaada ruqsad macdaneed dhul gaar loo leeyahay, waana qodob cusub oo la soo kordhiyay, ruqsad macdaneed lama bixin karo si xeerka waafaqsa dhul gaar loo leeyahay lama bixin karo, iyadoo aan ogolaansho loo waydiisan mulkiilaha dhulkaasi u diiwaangashan yahay, ogolaanshahaasna looma bixin karo si aan macquul ahayn. Waa Qodobo badan oo cusub isna waxaa ku jira xadidaada ruqsad macdaneed dhul bulsho. Qodobada qaar way ku celi-celiyeen.

**Cutubka 3aad** ayay isna soo kordhiyeen oo Gudi tidhi waa lix qodob, laakiin markaan akhriyay waa afar qodob, waxay qodobkaas ku asaasaysaa Gudiddu shirkad Qaranku leeyahay oo macdan qodista inoo qaabilsan iyo gudideedii iyo nidaamkeedii iyo shaqadeedii oo waa dhowr qodob in la quruxiyo ayuun baa loo baahan yahay waa qodobo aad loogu baahan yahay in Xeerka lagu daro. Dhamaan qodobaas cusubina waxay u baahan yihiin in dib la isugu habeeyo qaarkood lambar ma laha, marka meesha uu qodob kasta galayo ee ku haboon iyo cutubyada meeshuu kag haboon yahay, waa in dib la isugu eego oo la isla saxo.

**Cutubka 4aad** oo kale ee soo jeedinta Gudidda Qodobka 28aad farqada kharashka sanadlaha ah isma qabanayaan oo isma laha, Qodobka 50aad ayaa qeexaya kharashka sanadlaha ah, marka halkaasina dib u habayn bay u baahan tahayo isma laha.

**Qodobka 58aad** ee Warbixinta Gudidda waxay gudiddu tidhi waxa lagu kordhiyay 3 farqadood meel alaale meelay ku taalna waan garan waayay halkaasina isma keenayaan ee isna dib ha loogu noqdo.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye** **(10min 50sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka, Mudanayasha, Saxaafada iyo Marti-sharafta iyo Shaqaalahaba waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka Asc. Salaam ka bacdi sidii uu xildhibaankii iga horeeyayba uu sheegay xeerkani waa xeer aad u balaadhan, hasa yeeshee waa xeer muhiim ah mudo dheerna Golaha horyaalay, waxaana xeerkan looga baahanyahay in uu waxyaabo badan oo hada socda uu xadeeyo, dakhli iyo dhaqaalana wuu soo galinayaa dalka, maadaamo oo uu mihiimadaa leeyahay waa in xildhibaanadu si qoto dheer u eegaan uguna hadlaaan.

Doodaydu waxay ku koobantahay waxyaabo yar-yar oo muhiim ah, waxaanan ka duulayaa xeerkii xukuumadu inoo soo gudbisay waxyaabihii aan ku arkay intaan ka gaadhay, aniga oo ka bilaabaya tusmada xeerka *qodobka 8aad ee tusmada xeerka waxaa ku qoran awoodaha iyo waajibaadka wasiirka* halka ay xeerka dhexdiisana ku qorantahay *wasaaradu waxaanan soo jeedinayaa in laga dhigo wasaaradda.*

*Qodobka 99aad u yeedhida Maragyada iyo Qodobka 100aad oo ah Ciqaabta cida diida ama dhayalksata in ay xaadirto maraga* waxaan qabaa labadaa qodob in ay yihiin laba qodob oo ah in meesha laga saaro ay tahay waayo wasaaradu maxkamad ma aha oo waxyaabahaa waxaa iska leh hay'adaha Garsoorka sidaa awgeed waxaan *soo jeedinayaa in laga saaro (hal mudane ayaa taageeray).*

Ajuurooyinka sanadeed way ku qeexantahay oo wax badan ayay sheegaysaa sida xeerka loogu soo daray waa wax wanaagsan meelaha qaarkoodna waan taataabanayaa, aniga oo wali ku jira Eray-bixinta Xeerka waxaa ku qoran **Ruqsada Macdan Qodista** *kuma qeexna ee waa in lagu soo qeexaa.*

**Qodobka 5aad lahaanshaha iyo Gacan ku haynta Macdanta,** *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa dib u habayn lagu sameeyo oo hala waafajiyo sida uu dhigayo xeerka dhulka iyo dastuurka* waayo dhulkuna waa hanti uu ilaahay u hibeeyay shacabka Somaliland.

**Qodobka 6aad Mabnuucida sahaminta iyo baadhista Macdanata ogolaasho la'aan;** xeerkan inta badan waxaa ku badan qof, qofna xeerka kuma haboona ee waa in uu noqdaa qofkaasi qof qaanuuni ah oo leh shirkad ama ka masuul ah shirkad ogolaashana ka soo qaatay wasaarada Ganacsiga oo uu lahaadaa liisan uu cashuurtana ka bixiyo, waayo sida aan ku xusnay markii aanu samaynaynay xeerka shirkadaha in uu qof yeelan karo ama ay dad koox ahi wada yeelan karaan shirkada. Waayo halkaa hadii la yidhaa qof waxaa meesha soo gali karta qof jeclaysi, waxaa sii gali kara musuq iyo waxyaabo aan loo baahnayn dawlad la'aan.

**Qodobka 6aad Farqadiisa 3aad,** hantida khayraadka macdaneed waxay la wareegaysaa dawlada ayaa ku qoran markaa wax ay dawlada ka wareegaysaa ma jirto waayo iyada ayaa ka masuul ah dhulka, markaa waxaan *soo jeedinayaa in laga dhigi way intifaaceedu u wareegayaa* markaa sida uu xeer 17 sheegayo dhulka dawlada ayaa leh oo ciday doonto inta ay ka qaado magdhaw siinaysa iyada oo u raacaysa xeerarka dalka oo uu xeer 17 ugu horeeyo. **Qodobka 19aad** ee xeerkani waxa uu sheegayaa sidaa aan ka soo hadlay.

**Qodobka 7aad noocyada Ruqsada Macdaneed:-** xuquuqda madacdaneed ee loo bixiyo xeerkan waxaa lagu qoray 7 faqdadood, halka qodobka 111aadna lagu sheegay laba 5farqadood markaa waxay u baahantahay in la isla eego oo labadaa ka maqan la raadiyo.

**Qodobka 9aad** ee ah in uu wasiirku sameeyo xeer nidaamiye, cuboonaysiinta foomamka, wax-ka-beddelka, wareejinta iyo waxyaabaha la midka ah si loogu dhaqan galiyo waxaa la siiyay wasiirka, *waxaan soo jeedinayaa in awoodahaasi waafaqsanadaan xeerka.* Si uu u fuliyo awoodahaa isaga oo aan khilaafayn xeerkan.

**Qodobka 58aad**waxaa ku qoran shaqsi aan shirkad lahayn, waxaan leeyahay waa in shardi laga dhigaa in uu shirkad leeyahay maadaama oo uu madan baadhayo ama uu qodayo, waayo qof kali ah oo ruqsad la siiyay macno badan ayuu yeelan karaa. Markaa way soo non-noqaysaa qof ama shirkad ee waa in laha taxadiraa qofku hadii aaanu shirkad lahayn in uu macdanta ka faa'iidaysto ha noqoto sahamin, qodid iyo ganacsiba.

sidoo kale waxaan ku arkay xeerka in la leeyahay waxaa ruqsada la siin karaa qof ama shirkada maqan, markaa waxaan leeyahay taasina meesha ma qabato ee halaga daayo, sidoo kale waxaan xildhibaankii iga horeeyay ku raacsanay waxyaabo badan oo ah soo jeedinta gudidda marka laga reebo qodobka odhanaya macdanta la soo saaro waxay dawladu ku leedahay 10% hadayna waxba ku darsan, *Anigu waxaan soo jeedinayaa in la yareeyo oo laga dhigo 5% waayo isga oo wax badan soo saaraya oo laga qaadayo ajuuradii hada in culays dheeriya la saaro ma haboona*, taasina waxay dhiiri galinaysaa maal-gashiga hadii laga dhigo 5% hadii 10% laga dhigo way ka maagayaan shirkaduhuba'

sidoo kale qodobada cusub ee ay soo kordhiyeen wey wanaagsanyihiin kaliya waxay u baahan yihiin im dib u habayn lagu sameeyo oo meeshii ay ku haboonaayeen ama loogu talo halay la geeyo taas oo u baahan in Gudi Gaar ah loo saaro si ay iskugu habeeyaan WSC.

**Soo jeedin:-**in Gudi Gaar ah loo saaro si ay iskugu habeeyaan

**Md. Maxamed Cali Xirsi (Obaama)** **(2min 40sec):-** Acuudu bilaahi Mina-shaydaani Rajiim Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka iyo Mudanayasha waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka Asc, ugu horayn mudane Gudoomiye mudanayaashii iga horeeyay waan ku raacsanahay doodooda iyo qodobadii ay soo jeediyeenba, xeerkani

waa xeer muhiim ah sidaa xidhibaanadii iga horeeyayba ay sheegeen waana xeer in badan ina horyaalay hadii uu ay gudi haysay iyo hadii uu golahaba yaalay, waxaana loo baahan yahay in aynu go'aamo Deg-Deg ah aynu ka qaadano oo ay xildhibaanadu ay aad u eegaan muhiimada xeerkani uu leeyahay.

Xeerkan muhuumada uu leeyahay waxaa ugu horeeya in uu sameeyo kobcin dhaqaale iyo miisaaniyadeedba, marka labaad waxaa kale oo uu samaynaa shaqaalayn badan iyo shirkado badan oo yimaada oo uu qof waliba uu shirkad samaysto oo halkaa ay shaqaale badani ay ka soo baxaan ayuu keenayaa xeerkani, taasina waa sababta ay muhiim inoogu tahay in aan aad uga shaqayno xeerka wixii aynu ku dari karno iyo wixii aan ka reebanaba.

Waxaanan aad ugu mahadnaqayaa Gudidda oo aad ugu soo shaqaysay iyo xukuumada oo xeer aad u balaadhan inoo keentay waxaanan ku bilaabayaa in xeerka aynu aad u falaaqayno ee aynaan meelo kooban aynaan awooda saarin.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in golahani awoodaha uu leeyahay uu ku daro xeerkan, iyada oo meelo kooban laga daray xeerka oo aan qabo in intaa laga balaadhiyo ama cutub dhan oo awoodaha golahani ku leeyahay xeerkan ama xeerarka inaga baxaya oo aynu ku miijino hadii ay noqoto yaadhitaan aynu wasiirada u yeedhayno, hadii ay noqoto xog qoraalka oo aynu ka helayno wasaaradaha iyo hadii ay noqoto baadhitaan lagu sameeyo miisaaniyadahooda iyo ruqsadaha la siinayaba ayaan anigu qabaa.

**Qodobka 117aad Farqadiisa 2aad Xarafkiisa "A"** hadii uu shakhsi yahay ganaax aan ka yarayn 3,000 kun oo doolar ama xadhig laba sano ah iyo hadii uu shirkad yahay 30.000 kun oo doolar *halkaa waxaan soo jeedinyaa in la kala reebo ganaaca iyo xadhiga oo ganaaxa laftiisa la yareeyo oo shirkada lafteeda 30,000 kun ee doolar laga yareeyo oo laga dhigo 3.000 kun halka 3,000 kun ahna laga dhigo 1,000 doolar.* Wixii ka danbeeyan ay raacdo nidaam haba la kordhiyee.

**Qodobka 122aad;** waxaan qabaa in aanu qofka askariga ahi aanu iska xidhi karin qofka ama shirkada ee waa in dib u eegis lagu sameeyaa, waana in maxkamado la maraa waana in waaran la helaa lagu qabanayo qofka ama shirkada sida ay sheegayaan xeerarka kale ee dalku.

**Qodobka 129aad** waa sidii aan hore u soo sheegay oo waxaad moodaa in xeerka uu ka buuxo iska xadhig aan sharci ahayn oo qofkii ama shirkadii la xidhayo iyo ganaaxyo leh lacag *waxaan qabaa in la kala saaro xadhiga iyo ganaaxo oo qofka digniino loo qoro hadii ay xadhig noqotana waa in la yareeyaaa xidhiga. Waana in loo raacaa xeerarka kale ee dalka ee waajibinaya ganaacyada iyo xadhiga ee waa in aynaan xeerka ku bilaabin.*

**Qodobka 130aad** sidoo kale waxaa qodobkana ku jira xadhig iyo ganaaxyo waxaanan qabaa in laga saaro ganaaxyadaa iyo xadhigaa, *waxaanan soo jeedinayaa in dhamaanba la laayo waxaa xadhigyo ah ee ku qoran qodabadaa aan soo sheegay ama lagu badalo ganaaxyo ka bilaabmay 1,000 doolar.*

Waxaa kale oo aan qabaa in ayna shirkada ajaanibka iyo ku wadaniga ahi aanay u sinaa siyaabaha Rugsada loo bixinayo sida aduunyada kalaba ay sameeyaan, waxaanan qabaa shirkad kasta oo cusub oo dalkeena timadaa waa in ay wada shaqayn ama waa in ay shuraaki noqdaan shirkada wadaniga ah ee dalkeena ka jira ee waa in aanay noqon inta ay shirkad wayni iska timaado wixii yaraa ee jiray ay baa'biiso oo ay shirkadihii wadaniga ahaa wixii ay qaban lahaayeen ay qabtaan ayna halkaa ku baa'ba'aan, sidaa awgeed waxaan qabaa in aynu ruqsada ku darno in ay wada lahaansho noqdaan shirkadahaa caalamiga iyo kuwa wadaniga ahba oo halkaa ay ka helaan khibrado si ay u sii shaqeeyaan aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md Cabdiqaadir X Ismaaciil Jirde** **(9 min 20 sec):-** Guddoomiyaha, Xildhibaanada iyo Marti sharafta. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa barakaatu. Haddii aan xeerka aan u soo dhaadhaco, xeer anigu wax badan kamaan akhriyin, intii ishaydu ku dhacday ayaan baan ka hadli doonaa.

Daneeyayaasha xeerku waa afar qaybood, mid koowaad waa shirkadaas iminaysa mawqifkeeda ugu weynina waa macaash, midina labaad waa xukumada oo sidii misaaniyadu u kici lahayd oo ay qarash uga qaadan lahayd ama khidmad looga qaadan lahaa oo miisaaniyada loogu kabi lahaa, ta saddexaad waxa weeye dadkeena shirkada wax ku yeelan doona ama gadhwadeenka u noqon doonaa ama madax ka noqon doona oo Iyana si gaar ah wax u danaynaya, ta afaraadna waa dadweynaha deegaanadaa ku dhaqan macdanta laga qodaayo.

Afartaa danadood sidii la isku waafajin lahaa oo mid waliba dan gaar ah leeyahay ayaa meesha ku taala. Waxaan anigu ka hadlayaa ilaalinta deegaanka. Waddamo badan baa caalamka laga soo arkay, shirkadaa macaash doonka ah dee xil gaar ah oo deegaanka ka saarani ma jiro, wax alaale wixii macaashkeeda hoos u dhigayana way ka warwareegaysaa oo ku dhiiran mayso, qodobada ilaalinta deegaankuna waa qarash dheeraad ah oo ka baxsan wixii la soo saarayey ee la iibinayey, markaa waxaynu ogaanaa in iyadu mar walba aanay danaynayn halkaas.

Waa wixii lagu qasbi karo ayey qabanaysaa uun oo dedaal ugu yar ayey gelinaysaa haddii aan loo soo jeedin. Xukumadaha dunida saddexaad waxaynu ku baranayn oo ku naqaanaa wax la yidhaa (State Capture) oo ganacsatada waaweyn kooxuunbaa abuurmi doonta inay shirkadaa u noqota gaashaan oo Iyana danahooda ku ilaashanaya.

Deegaanku markaa madi ayuu noqdaa cid u hadasho ma helo oo shirkada baawarkeeda ayaa weyn xukumada oo qarash ka helaysanaysana baawarkeeda ayaa weyn oo Iyana dadkii shirkada ku jiray ama mukhalaska u ahaa way ka awood weyn tahay dadkii deegaanka.

Halkan qodobaa ku jira la yidhaa waxa la samaynayaa (Impact Assessment), impact assessment dadka samaynaya ayey ku xidhan tahay. Shirkadu cidbay soo kiraysanaysaa impact assessement u samaysa inay quudiso (feeding) oo macluumaadka iyada ka qaataan, xukumadu cidbay samayn kartaa. Dadka deegaanku awoodaas iyo kartidaas malaha, halkan waxa ku taala waa lagaka tashanayaa, awoodoodu intay leegtahay kuma xadidna halkan markaa ama waa la qaataa ama waa la diidaa, laakiin waxay soo jeediyeen in la tixgelinaayo xeerkana kuma xusna. Dadkeenu sophisticated ayuu noqon doonaa, waxa laga yabaa inay ku adag tahay inay impact assessment sameeyaan, laakiin cdi u samaysa haddii ay is abaabulaan oo lacag iska ururiyaan.

Waxa jira NGO iyo consultant’s organizations waxan yaqaana fikirada laga galo deegaankana yaqaana oo ay soo kiraysan karaan iyaguba oo macluumaad xagooga ka socda ay ka heli karaan oo aan lagu kalsoonaan kii xukumada iyo shirkada. Markaa in la qeexo awooda dadka deegaanku ku leeyahay impact assessment oo laba u qaybsamaya;

Environment impact assessment Social impact assessment;  Awoodaa meesha ku jirta ee kala saraysa bal dadkii in loo damaanad qaado, damaanad qaad inay xeerkan ku helaan inay hawlaas ka qayb geli karaan oo waxay soo jeediyaan ma noqonayo wax la tixgeliyo oo cuqaal iyo afar xildhibaan ayuunbaa loo yeedhi doonaa oo la odhan doonaa soo qanciya danbaa inoogu jirtee.

Anigu point-ga ugu weyn een ka hadlayaa waxa weeye in la xooiyo doorka uu ku yeelanayo dadka deegaankaasi ama umadda kale ee dalka degan oo danaynaysa waxaas. Macdantu way inaga wada dhaxaysaa. Maalin dhawayd waxaan daawaday barnaamij laga hadlayey macdanta oo South Africa marka macdanta la safaynayo waxa ku jira yuraaniyamta buur dhan baa la sameeyey oo hadhaagii ah oo la sibdhiyey oo dilaacday oo magaalo badan laga guuray. Shirkaddii waxaa samaysayna iska tagtay oo qarniyo hore ayey ahayd oo xabaal iyo ninkeedii oo kala tag ayaa dhacda. Dadka deegaanka ayaa looga tagaa wasakhda dadka dawladuna halkan ayey fadhidaa oo shuqul kuma laha. Shirakadiina waaba laga ayaab markay dhamaysato isaga tagto oo dadka oo aqoon lahayn, awood lahayn dabeeto isaga tagto oo xukumaduna qaybteeda qaadato, shirkaduna qaybteeda qaadata markaa waa in lagu cadeeyaa awooda dadka deegaanka xeeka.

Mida kale lacagtan qaabka loo qaybinaayo sidaan ku arkaayey dawlada dhexe, maxaa taas lagu saleeyey ma sample ayaa lagu soo qaatay wadamada dunida, waa in loo fasiraa waxa lagu saleeyey, markaa marka percentage la qorayaa waa in la helaa waxa laga duulayo.marka xeerkan la samaynayo inagu reference ma haynee waxa laga qaatay adduunka.

Mida kale waa in shirkadaha waxa doonaya laga ilaaliyo inay qayb ka noqdaan xeerkan oo aanay caqabad ku noqon, waxaan leeyahay xukumadu bad ayey ku dhex jirtaa oo shirakadiina lacag ayey ka doonaysaa, dadkiina lacag ayey ka doonaysaa oo marka lacagtu dhamaatana dadka ayey cod u doonanaysaa.

Waxaan leeyahay awooda dadka deegaan halgu daro qodobka ka hadlaya impact assessment waa in la xoojiyaa. Waxaanan u mahadcelinayaa xildhibaanadii ka dooday iyo kuwii soo diyaariyeyba.

**Md Ibraahim Jaamac Cali (Rayte)** **(11min 55sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye horta xeerkani waa xeer aad u mihiim ah, wuxuu isku darsaday saddex arrimood. Muhiimad gaar ah ayuu inoo leeyahay, waxyaabo badan oo halisteeda lehna inoo keeni karra, loona baahnaa runtii xiligan uu imaado.

Waa xeer farsamo, maaha xeerka arrimaha bulshada, habaynaya waa xeer u baahan runtii khibrad iyo aqoon dheeraad ah ee macdanta iyo maamulkeeda, waxyeeladeed iyo dhibaatada kai man karta in laga hawlo galo waana xeer aad u balaadhan.

Xeerarkan oo kale runtii muddo dheerbay Golaha dhexyaaliin oo doodo badana laga galaa, anigu soo jeedin maayo in akhris qudha lagu dhameeyo. Waxaynu baahnayn in xildhibaanadu in macdantan iyo regulation-keeda Golaheena way inagu cusub yihiin. Waxaynu baahnayn markan oo kale dad khuburo ah in ay Golaha yimaadaan oo warbixino ku saabsan hawlaha kan ay inaga siiyaan. Waxay u baahnayd wasiirka laftiisu dee policy xukumadu ka leedahay arrimahan iyo waxay ku salaysan tahay iyo mabaadiideeda.

Waxaan qabaa inaynaa xeerkan ku deg degin oo aynaan si hawl yar odhan. Markaan intaas hoos uga dego way adag tahay waanay badan waana technical waan xeer farsamo, waanay adag tahay in dhawr iyo sideetan page iinuu xildhibaanku akhriyo.

Waa muhiim in labada arrimood aan is dultaagno oo aynu odhan karno inta kaga jirta xeerka kuma filna, waana arrinta bulshada meesha macdanta laga qodayo, cid macdanta qodaysa iyo xukumada iyo cid meesha degan sida go’aamada loo wada gaadhayo. Waad

la socotaan had iyo jeer dhibaatooyinbaa ka dhaca, dhibaatooyinka ugu waaweyni sida macdanta iyo baadroolka waxaasi waxa la yidhaa laba mid ayey noqdaan;

Ma waxay noqdaan nimco ilaahay umadaa siiyey oo ay ku badhaadhaan, ama waxay noqdaan dab iyo holac afka gaalada halaag ayey yidhaahdaan (Calves). Dad badan ayuu ku noqday Africa ayuu ku noqday. Waxayaabaha ugu badan ee dhibaatada keena waxa ugu badan macdanta iyo badroolka, iyadoo la odhan karo waa khayraadka ilaahay ku manaystay dadka, hadana waxay ku noqon karaan wax dalkaasi ku burburo, waxaanay ku xidhan tahay sida shuruucda arrimahaas ku saabsan loo dejiyo, loo dhaqangeliyo iyo mabaadiida lagu hagayo ayey ku saabsan tahay.

Waxaan qabaa dhibaatooyin badan ayeynu qabnaa, waa run waynu u baahan nahay inaynu macdanteena la soo baxno, maalgashigana waan soo nolol inaynu abuurno waynu u baahan nahay, dhibaato inay ka timaatana way ka digtoonaanaynaa. Waxaad ogaydeen wixii ka dhacay Genel energy farsamo xumadeena ayey ahayd shirkadihiina way shaqayn kari waayeen.

Sida xeer-hoosaadkeenu dhigayo waxay ahayd in xeerkan oo kale ay la socoto maabaadiidii ama siyaasadii xeerka (policy) waayo xildhibaanadu garyaqaano maaha waxay u baahan yihiin, iyagu wixii farsamo ah ma galayaane, waxay doonayaan inayogaadaan mabaadiida siyaasiga ah ee xeerkan lagu hagayo, waxaana taas tilmaami lahay oo fahankiisa xildhibaanada u fududayn lahayd siyaasada lagu hagayo xeerkan, ama siyaasadii macdanta lagu hagayey oo xukumadu lahayd.

**Soo jeedin,** Waxaan soo jeedinta lahaa arrinta bulshada waxay noqon kartaa arrin qarax ka dhasho oo suurtogelisa in inaynu macdan qodono is hortaagta. Arrintaa waxaan qabaa in aynu si buuxda doorka bulshadu leedahay, xuduudka shirkadu ay leedahay iyo doorka ay xukumadu leedahay ee ka dhex shaqaynaysa bulshada iyo shirkada qodaysa in ay si fiican ugu qeexnaato, si aynu uga digtoonaano dhibaatooyin meeshaa ka dhasha.

Ta labaad arrinta deegaanka ee xildhibaan cabdiqaadir jirde ka hadlayey waa arrin muhiim ah. Soomaalidu waxay tidhaahdaa nimco waliba nusqaanteed leh. Waa nimco in dhulkeen macdan ka helno oo ka qodano oo aynu ka macaashno, laakiin qaabka aynu maaraynayno waxay keeni kartaa in nusqaanteedu ka badato oo inaga maax dumiso.

Waxaan qabaa deegaanku waa deegaanka aynu ku nool nahay waa wax muhiim ah waa wax inoo hadhaya, macdantu way dhamaanaysaa waa la iibsanayaa way ka baxaysaa meesha, laakiin in aanay deegaankeena ku reebin raad oo noqon karaysa iyada oo lagala baxay macdantii haddana lagu noolaan karo, xeerarku waa uniform si baana suudhka loo wada tolaa. Afriki lama tartami karayso shirkadaha macdanta qoda, waayo way

inaga macluumaad badan yihiin, way inaga dhaqaale badan yihiin, way inaga farsamo wanaagsan yihiin, laakiin waa in aynu mar walba ka feejignaano.iyagu waa macaash doono way ka tagayaa. Dhaawucu inaga ayuu inna gaadhayaa, waa inaynu deegaanka ilaashanaa waana in qaybta deegaanka culusays badan saarna oo qodobada halkan ku yaalo qaar ka faahfaahsan ka helnaa.

Dunida laga qoday macdan Africa waxay haysaa khibrad badan oo baadaa oo ay ka dambeeyeen macdan qodista waa muhiim. Waxaan leeyahay waa in aynaan ku deg degin xeerkan si aynu wax badanuga ogaano, waana in khiburo deegaanka la qabtaa oo xeerkan inagala Talisa sida xildhibaan Cabdiqaadir sheegay. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan akhris labaad la marsiiyo.

**Md Farxaan Maxamed Cali** **(6min 38sec)**:- Bismilaahi raxmaani raxiim. Runtii aad ayaan ugu qancsanahay xildhibaanadii ka dooday sida xildhibaan maxamed Xuseen, Xildhibaan cabdiqaadir iyo xildhibaan Rayte. Arrinta ugu horaysa ee aanu isaga midka nahay waa deegaanka. Deegaanka ilaaliyo aniga oo ka duulaya qaacidada, si xeedhana xeedho u noqoto ilkana u nabad galaan. In macdantii la soo saaro deegaankuna ku badbaado oo xeerku damaanad qaadayo oo deegaanka la ilaalinayaa waxa uu ka kooban yahay laba qaybood;

Qaybi waxa weeye xoolalay aynu nahay deegaanka aynu ku nool nahay dadku reermiyi weeye oo way degan yihiin. Sida cabdiqaadir sheegayey in bii'ada la gurto oo la raro oo kiimikadii la isticmaalay meel lagaga tagay, waa macdantiina la qodaa bii'adiina u badbaadaa oo xeerku damaanad qaadaa si dadku ugu noolaan karo, xooluhu ugu noolaan karaan jiritaankuna u socon karo.
Yaan inta warshado la keeno aanay siigada inagu kicin oo dadka iyo xoolahuba ku noolaan kari waayin sida naigeria ka dhacday oo deegaano dhan dadkii ka qaxeen oo shirkadii waxaa samaysayna ay magdhaw bixin kari wayday.

Inaga waa in xeerku muujiyaa deegaanka sidee loo ilaalin karayaa waa qodob. Qodobka labaad waxaa la gurayo ee deegaanka laga gurayo dawlada waa loo xadiday oo waxa la yidhi 10% ayey qaadanaysaa, laakiin deegaankii muxuu qaadanayaa dadkii sidee horumar loogu samaynayaa, shirkadihii percentage intee leeg ayey qaadanayaan. Dadkii maxaa kaga noqonaya, tababarkooda, caafimaadkooda, harumarkooda, waxbarashadiidii siduu deegaankii uga qayb qaadanayaa. Waayo company isaga ayaa shaqaysanaaya.

Waxa loo baahan yahay cidii daryeeli lahayd, xeerkuna waa in uu damaanad qaadaa xeerku arrintaas. Waxaan soo jeedinayaa waxa jira dad deegaanka aqoon u leh, waxa jira

dad macdanta aqoon u leh, waa in aynu dadkaas kaashanaa oo la tashanaa waa in aynu akhris labaad marina xeerkan.

Mida kale qodobo yar yar ayaa jira sida qodobka 129aad, 130aad, 132aad, 137aad intuba waxay ka hadlayaan qasiraad $3000 ah. Macquul maaha in nin miskiina oo shaqaysanay oo digniin la siin oo shaqo joojin la siin in la yidhaa $300 ayaa lagu qasiray oo shirkadii la yidhaa $30,000 ayaa lagu qasiray dee macquul maaha. Qofka waa in la yidhaa $300 ayaa lagu qasiray. Haddii uu digniibta koowaad qaadan waayo oo amarka qaadan waayo waa in la yidhaa $300 ama $500, laakiin in la yidhaa $30,000 waxa meesha ka muuqanaysa naxariis darro.

**Waxaan soo** jeedinayaa qodobadaas ha laga saaro xeerka ganaaxyada faraha badan wata. Qodobka labaad waxa aan ula yaabay oo ah qodobka 129aad sarkaalka suuqa iska jooga ayaa shirakdii dhamays ee shaqaynaysay ee diiwaangashanayd, ayaa sarkaal suuqa iska jooga oo maxkamad soo marin ayaa xidhi kara sharcigana ka qaadi kara. Waxaan xasuustay ciqaamadii sucuudiga ayaa waxa ciqaamada ka qaadi kara oo kaa jeex jeexi kara askari suuqa jooga. Dee sharcigaa shaqeeya, maaha in nin suuqa iska jooga awood loo siiyo oo la yidhaa waad ka qaadi kartaa, jeex jeexi kartaa waanad soo xidhi kartaa.

Markuu shilin ka waayo kan ilaalinayaa ee askariga ahi wuxuu soo xidhi karaa markuu lacag ka waayo, waxaan leeyahay waa in laga saaraa qodobkaas. Shirkada waxa soo ashkatayn karta Wasaarada, deegaanka meesha uu ka shaqaynayo ruqsadana waa laga qaadi karaa oo wasaarada ayaa ka qaadi karta,iyada oo maraysa nidaamkii maxkamadaha iyo dacwada, laakiin maaha in sharciga laga saraysiiyo cid, waxaan leeyahay waa in sharciga lagu shaqeeyaan oo sharciga shaqeeyaa.

**Md Maxamuud Dhunkaal Guutaale** **(21 min 30 sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. In kasta oo aan soo akhriyin xeerkan oo aan hadda qaatay, haddan inyar ayaan is dultaagayaa. Xeerkani wuu ka duwan yahay xeerarkii hore oo waxa uu baahan yahay aqoon farsamo oo dadka aqoonta lihi talo ka bixiyaan.
Waxaan u qaybinayaa saddex qaybood:

- Sahiminta
- Qodista iyo
- Suuq-gaynta

Marka la doonayo in macdan la qodo waa in marka hore la sameeyaa daraasad balaadhan oo laga duulo, waan deegaanka wax laga sahaminayo la ogaadaa caradeeda, dhirteeda, biyaheeda, buuraheeda, noolaha ku nool inta nooc ee uu yahay. Haddii hadhaw dhibaato ka timaado macdan qodista, si cidaa dhibaatadaas gaysatay lagula xisaabtamo.

Waa in marka hore xogteeda la hayaa haddii ay noqoto macdan iyo badrool. Hadda ka hor waxa dhacday iyada oo sahan la samayn meeshii cagaf la mariyo oo ay saamayn ku teelatay, waxa la jaray dhirtii mana jirto cid loo hayo oo lagula xisaabtamo.

Macdantu waxay u badan tahay Gobolada Awdal, Saaxil iyo Sanaag. Waxa la odhanayaa macdan ayaan qodayaa oo warqad ruqsad ah ayaa la siinayaa, lama hayo sahan lagu eego ama laga duulo. Wuxuu odhanayaa waxaan qodayaa kobar, haddana meesha dheeman ayuu ka guranayaa. Marka la raraayo iyo marka la qodaayo cid alaale cid war ka haysaa ma jirto.

Waxa la qododaa godad waaweyn, godadkaaas macdanta laga qodoyaa sunbay leedahay, dad ayey ku duntaa, roob ayaa da'a dadkii iyo xoolihii ayaa ka cabayaa. Waa sun cid alaale wax ka ogi ma jirto. Waxaan rag barkad qodayaa oo macdan ugu tagay oo ay dhaawac iyo dhibaataba ay u gaysatay.

Waxaan leeyahay inta aan la qodin macdan waa in la sameeyaa sahan guud ama shirkadu ha samayso ama cid kale ha samaysee in aan liisan la siin iyada oo xog dhab ah laga haynin ayaan soo jeedinayaa.

Sahamintu waa qaybta ugu wanaagsan xeerka oo reermiyiga ayaa sahan taga marka ay guurayaa, waxaan leeyahay yeynaan waddanka sii daynin waddanka waa in aynu iska hubinaa. Shirkadaha inoo imanayaa maaha kuwo diiwaangashan oo meel loogu hagaago leh, magac aan lahayn oo aan caymis ku jirin

Waxaan leeyahay haddii aan xeerka la samayn yaan sahan la samayn ilaa aynu ogaanayo xogta dhabta ah ee macdanta dhulkeen ku jirta haddii ay tahay mid iibsami karta.

Marka la doonayo in macdan xeer loo samaynayo, waxay tahay in la eego marka dhibaatada inaga imanaysa, waxa dhacaysa nin macaash doon ah oo dalka ku qabsanaya qofku meesha uu leeyahay oo aanay cidna u dhaxay oo buurtii iska fananay oo warqad la cararaya.

Waa marka hore dadka deegaanka la wargeliyaa oo la ogaysiiyaa in deegaankooda wax laga qabanayo, waxaan leeyahay waa dadka tuulada la wargeliyaa oo ay qayb ka noqdaan, oo lagu xigsiiyaa degmadii, oo lagala hadlo degmada shaqaalaha iyo percentage la siinayo loo sheego.

Waxa imika arrinta laga bilaabaa dawlada dhexe, iyada qof madaraqyo iska sita uu iska tagayo deegaanka oo ay isku dhacaan dadkii deegaanka, iyada oo aad ogtihiin dilalka iyo dhibaatada ka dhacday arrintaas.

Sahaminta waxaan ku daynayaa waa in la sameeyo daraasad guud oo wadanka oo dhan, lana ogaado noocyada ku jira, isla markaan deegaanka, biyaha, buuraha iyo noolaha ku jira haddii hadhaw ay dhibaato soo gaadho lagula xisaabtamo. Waa qodobka 18aad ee sahanka.

**Macdan Qodista.** Sahanka marka la ogaado waxa imanaysa qodis. Waxaan leeyahay marka la qodaayo macdanta waxay u baahan tahay qalab inaguna mahayno qalabkii lagu qodi lahaa. Waxa laga yaabaa in halkaas macdan qaali ay ku jirto oo aanu haysan farsamadii, qalabii iyo aqoontii uu ku soo saari lahaa oo haddii uu is yidhaa la soo baxo uu dhibaato kala kulmaa oo isaga dhibaato u gaysato, macdantuna noqota mid burburta. Markaa haddii aan qalabkii la hayn waxa imanaya laba qasaare oo kala qofkii oo dhibaato soo gaadho iyo macdantii burburta. Iyada waxyaabaha dhirta laga sameeyaa uma baahna in la ilaaliyo, laakiin macdanta kale ee u baahan in la ilaaliya waa kuwo badan oo runtii u baahan iyo aqoon iyo farsamo loo helo.

**Suuq-gaynta.** Sahanka iyada oo ay ku xidhan tahay marka la ogaado cadadka ku jira, ma noqon kartaa mid la iib gayn karo oo ha noqdaan shirkado ajaaniba iyo kuwo maxaliya. Haddii macdantu aanay ahayn mid la iib gayn karo, maaha deegaanka la xumeeyo. Barrigii shidaalka la sahamin jiray, waxa la helay shidaal oo inta la helay oo riigii lagu taagay, ayaa hadana wuxuu noqday wax aan la iib gayn Karin waana laga tagay. Imika riig biyoodka ka awrka laga dhaamiyo iyo rig biyoodka deegaan dhami ka dhaan sadaan isku mid maaha.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan leeyahay yaan xeerkan lagu deg deg degin oo boqolaal shirkadood oo ajaanabiya oo aan inoo danaynay oo dalka jooga iyo kuwo kale oo soo socda oo aanu ognahay oo xeerkaasi dabar ku yahay.

Haddii aynu u ansixino sidii Nageria ayeynu ku dambaynaynaa. Maafiya wadata ciidankoodii caloosha u shaqaysta wata ayaa iman oo aynaan waxba ka qaban karayn. Waxaan leeyahay yaan xeerkaa la ansixin inta loo heliyo dad khuburo ah oo inagala shaqeeya.

**Guddoomiyaha:** doodii way inoo soo gebogabayday, waxaynu barri ka doodi doonaa xeerka xaqsiinta ciidanka oo barri iyo saadambe ka doodi doonaa. Fadhigu wuu inoo xidhan yahay waa inoo barri iyo saadambe.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
__________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSL**
______________________________